



Mercy Housing

*Ku Soo Dhaawow
Gurigaada Cusub*

Jadwalka uu ka kooban yahay

<i>Muuqaalka buuga leyliga iyo micnahooda</i>	<i>i</i>
<i>Waxyaabaha guud iyo magacyadooda</i>	<i>ii</i>

<i>Bixinta Biilka</i>	1
-----------------------	----------

DARYEELKA AMA ILAALINTA GURIGAAGA

(qol ama qolal dabaq ah)

<i>Baaris intaadan soo guurin ka hor</i>	2
<i>Fadhiga agagaarkiisa</i>	3 5
<i>Dhilqe</i>	6
<i>Jikada ama Madbaqa</i>	
<i>Diyaarinta Cuntada</i>	7
<i>Nadiifinta Cuntada kadib</i>	8
<i>Karin ama bislayn iyo Dubis</i>	9 10
<i>Alaabdhaqe</i>	11
<i>Makiinada Cunto Karinta</i>	12
<i>Saxanka ama waaskada wax lagu dhaq ee jikada/musqusha</i>	13
<i>Tuurista Qashinka</i>	14
<i>Musqul ama Suuli</i>	
<i>Nadaafada Guud</i>	15
<i>Dhibaatooyinka Musqusha</i>	16
<i>Biyo daadin iyo qubasho</i>	17
<i>Lama daayo/Doobi</i>	18

NABAD & AMNI

<i>Gambaleelka feejignaanta qiiqa</i>	19
<i>Dab</i>	20 22

Xaqa-sawirashada 2006 waxaa leh Guriyeenta Mercy, Inc. Xuquuqda oo dhan waa la keydsaday. Codsii ogolaansho ama warbixin intaa dheer waa in lagu soo hagaajiyaa: Mashruuca Guriyeenta Qaxootiga, Mercy Housing, Inc. 19999 Broadway, Suite 1000, Denver, CO 80202

NABAD & AMNI

<i>Marinka guryo ama dhismo dhex mara</i>	23
<i>Shabaqa Albaabada iyo Daaqadaha</i>	24
<i>Gargaarka Deg dega ee Caafimaad</i>	25
<i>Qiiqa</i>	26
<i>Qufulyada, Furayaasha, Soo galooti/Qariib</i>	27 28

BOOSTO & OGEYSIISYO

<i>Waraaqaha leysu diro; Ogeysiisyada lasoo dhejiyo</i>	29
<i>Codsiyada dayactirida</i>	30

INAAD NOQOTID DERIS WANAAGSAN

<i>Buuq; xallin dhibaato; xayawaanka guri joogta</i>	31
--	-----------

DHOWRISTA/ISTICMAALKA QUWADA KORONTADA

<i>Qalab heer kulka xaddida</i>	32
<i>Talasiin Kucaarwisa</i>	33 34

Buugani waxaa loo diyaariyey in loo isticmaalo qeyb kamid ah jiheynta ama warbixinta guriyeynta taasoo ay ku jirto ninka u xilsaaran arinkaada iyo qoyska qaxootiga ah. Loolama jeedo iney noqoto dukumeenti kaligiis taagan.

Qoraalkani waa dadaal wada shaqeyn ka dhexeeya Xarunta Jaaliyada Afrikaanka ee Denver (African Community Center) iyo guriyeynta Mercy Housing, Inc. Naqshada taswiirta iyo ra'yiga waxaa keenay Carol Kimball. Xarunta Jaaliyada Afrikaanka waa xafiis mashruuceedka Xarunta Horumarinta Jaaliyada Itoobiyaanka (ECDC) oo saldhigeedu yahay Washington, D.C.

Dukumeentigan waa wax soo saarka Mashruuca Caawinaadka Farsamada Howlqabadka Guriyeenta Qaxootiga, Lambarka Deeqda 90RB0015. Deeqda waxaa lagu abaalmariyey Guriyeenta Mercy Housing, Inc. Waxaana ku abaalmariyey Xafiiska Dib-udejinta Qaxootiga (ORR), Waaxda Caafimaadka iyo Howl-qabadka Bulshada ee Mareykanka. Ra'yigan ama Aragtida halkan ku qoran lagama yaabo iney muujineyso aragtida ORR.

Boogan Leyliga gebi ahaantiisa, waxaa ka arki doontaa muuqaalo bogag gooni ah Waxanina waa waxa sawir ama muuqaal walba uu micnihiisu yahay:



Tani micnaheedu waa ninka arinkaada ka mas uulka ah, Qofka kula maraya/ kula aqrinaya buugan adiga.

Magaca: _____

Lambarka Taleefanka: _____



Tani micnaheedu waa ninka guriga hanti ahaan u leh ama maamulka guriga.

Magaca: _____

Lambarka Taleefanka: _____



Medical



Fire



Police


Inaad ka garaacatid 9 1 1 taleefankaada waxey kuu soo de dejineysaa caawinaad. Waxaad waceysaa oo kaliya hadii aad u baahato caawimaad gargaar deg deg ah.




Tani micnaheedu waa **MAYA!** ha sameynin waxa taswiirta muujineyso.




Tani micnaheedu waxay tahay inaad qasaarineysid lacag. Isku day inaad sameynin waxyaabahan.



Samee kan maalin walba.



Samee kan usbuuciiba mar.




Samee kan bishiiba mar.


Waxyaabaha Guud iyo magacyadooda




Ogeysiis Guri
kasaarid



Tallaajad,
Furuntijeer
Qaboojiye



Saxanka ama
waaskada
wax lagu dhaqo
Furaha
qasabada Weel
godan oo wax
lagu shubto
Baanyo




Dab damiye




Daadinta
Qashinka



Halka lahu
qabeysto
Weel godan oo
wax lagu
shubto / Baanyo



Ganbaleelka
Feejignaanta
Qiiqa



Makiinada
Cunto
Karinta
Seere / Taxan
Waxa sida
silsilada safan



Godka
Musqusha



Qashin qub
Qashin
Qashin,
Khashin



Makiinada
weelka dhaqda



Qalab heer
kulka
xaddida



Dhar Dhaqe
Makiinda wax dhaqda



Koodka oggolaashaha ee
albaabka guriga ku yaalla
marka aad weydiisaneysid
inaad aqalka soo geshid



Dariishad A/C
Qaboojiye
(hawo qaboojiye)

Bixinta biilasha

January						
S	M	T	W	T	F	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

Waxaa waajib kuugu ah inaad bixiso ijaarka/kirada, Isticmaalka biyaha/lorontada/gaaska iyo biilasha kale waqtigooda **BIL WALBA** si aad u bilaabatid una ilaalisid aaminaad waanaagsan. Aaminaada wanaagsan waxey kaa caawineysaa inaad deymato lacag aad ku iibsato guri, baabuur ama aad ku bixiso waxbarasho kuleejo. Isticmaal liis warbixineed oo kaa caawina sidd aad u bixin laheyd biilashaada waqtigooda.

WELIGAA LACAG CADAAN AH BOOSTADA HAKU DIRIN!



Adiga iyo maamulaha waa inaad arrimaha gurigaada kala shaqeysiin ninka maamulaha guriga ah oo aad caddeysiin diiwaan gelisiinna wixii ka halleysan oo u baahan in la hagaajiyo inta aadan ku soo guurin. Tan waxay kaa caawineysaa in dabaajigaada aad ka heshid markaad ka guureysid gurigan.



January						
S	M	T	W	T	F	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

January						
S	M	T	W	T	F	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

Ku nadiifi rooga qalabka nadiifinta kaarbedyada ugu yaraan usbuuciiba mar. Ku nadiifi waxa kaaga daata saabuun iyo biyo isla markaaba. Alwaaxa dhulka waa in la tir tiro isbuuc walba.

Saabaanta ama alaabta guriga adiga ayaa iska leh inaad qaadato markaad guureysid. Waqti dheer ayaana heyneysaa hadii aad si wanaagsan u xifdisid! Alaabada guryaha, ee ah hantidaada waad la guureysaa marka aad guriga ka guureysid, marka laga reebo qalabka ay iyagu leeyihiin sida (faranjeerka, makiinadda cunto karinta iwm).

Haddii ay jirto su aal ku saabsan alaabta aad guriga dhigan kartid aqri waraaqaha heshiiska lagu galay ama la hadal maamulaha kiiskaaga.

Ninka gurigaada iska leh waxaa kaa rajeynayaa inaad qaadato saabaantaada iyo wixii aad leedahay markaad guureysid. Kabaha iska siib intaadan gurigaaga gelin. Arinkan waxey ka dhigeysaa rooga nadiis.





Haku shubin wax dareera ah rooga. Wey dhex galeysaa iyadoo ka dhex duseysa marooyinka hoostooda iyadoo ku reebaysa dhag dhag kaasoo aad u adag in laga fujiyo.



Ka nadiifi waxayaabaha ku daata **SIDA UGU DHAQSIYAHA BADAN!**

Waxaad isticmaali kartaa dawada ku jirta daasada nadiifisa rooga taasoo aad ka iibsan kartid baqaaladaha ama dukaamanka.



MARNABA HA U ISTICMAALIN WARANKILO ROOGA!



Hadii aad dhibaato kala kulanto wasaqda ama uskaga meel ku dhagta, weydiiso talo ninka kaa mas uulka kaa ah ama ninka guriga iska leh.



Wasaqda aad ka ugu dhagta, waxaad u soo kireysan kartaa Makiinada lagu nadiifio roogaga, xitaa waxaa kasoo kireysan kartaa dukaamanka waaweyn badankood.



Caruurta waa inaad bartaa ineysan ku ciyaarin daaha daaqada ama waxa hareynaya daaqada, iyo ineysan gidaarka wax ku calaamadeyn.

Ha fuulin ama ha ku boodboodin alaabta dusheeda!



DHILQAHA



Qaniinyada dhilqaha waa xanuun kuna casaaneyso meesha.



Dhiqaha wuxuu ku noolyahay maryaha ku jira alaabta meesha ay isaga laaban yihiin, dhinacyada darbiyada, katiifadaha iyo sariiraha. Haddii aad qabtiin dhilqe, ku dhaq sariiraha dhan biyo karkaraaiyo saabuun (Oomo) ee ku qallaji meel kulul, Faakumka mari joodariyaasha, alaabta (Furniture) katiifadaha iyo dhinacyada darbiyada isla mar ahaantiina ka bixi faakumka baakada qashinka ee tuur.



**WELIGAA HASOO
GASHANIN GURIGAADA
ALAABAHA JIDKA LAGU
SOO DAADIYO!**



Ka siki sariiraha iyo kuraasta fadhiga derbiga , firaashkana dhulka yuusan gaarin. Dhig qasacado biyo saabuun leh dhex gelina madaxyada sariiraha lugahooda.

DIYAARINTA CUNTADA



Hadii aad wax gaarsiiso miiska jikada dushiisa, waxaa lagaaga baahan yahay inaad bixiso wixii qarash ah ee ku baxa sameyntiisa markaad guureyso.

Markaad jar jareysid ama aad kidfeysid ama aad cad cad ugu goyneysid mindida, isticmaal shey aad ku dul jar jartid.



MARNABA HA DUL DHIGIN DHERI KULUL MIISKA JIKADA!

Isticmaal kuleylka wax la duldhigo ama shukumaanka waalasha kulul la hoos dhigo.



MARNABA HA KU DUL JARIN MIISKA DUSHIISA!



HAKU DUL JARIN SAGXADDA DHULKA!



NADIIFINTA CUNTADA

January						
S	M	T	W	T	F	S
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

Nadiifi miiska jikada dushiisa maalin walba.



Weligaa raashin dabool la aan ah ha uga tegin banaanka ama miiska. Tan wexey soo jiidaneysaa cayayaanka iyo doolliga.



WAXAAD BIXINEYSAA QARASHKA NADIIFINTA EE QOLADA HOWSHAAS LEH HADDII AY TAAS DHACDO PEST CONROL!



Waxay ku wanaagsan tahay in la doobolo cuntada laguna xifdiyo firintjeerka. Nadiifi iskafaalooyinka iyo qaanadaha firintjeerka si joogto ah kuna nadiifi saabuun iyo biyo.

MARKAAD GUUREYSID, HADDII UUSAN FARANJEERKA NADIIF AHAYN OGOW WAXAAD BIXINEYSAA QARASHKA NADIIFINTA!



KARINTA IYO DUBISTA


Markaad ku karineyso cunto makiinada cuntada lagu kariyo dusheeda, marwalba ku bilow kuleyka dhexdhexaadka ah dabadeedna u qiyaas. Hadii aad ku bilowdo kuleyl aad u sareeya, waxaad gubi doontaa cuntada iyo digsigga / dheriga oo kaa gubta. Waxaa laga yaabaa in aad gubtid dheriga salkiisa hoose!




Isticmaal maro qallalan ama maryaha gacan gashiga si aad u qaadid birtaawooyinka iyo digsiyada ku jira foornada.

BIRAHА DABKA AH EE FOORNADA WAX KU KARISO IYO KUWA SHABAQA AH EE KU DHEX JIRABA WEY KU GUBI KARAAN MARKEY KULUL YIHIN!

KARINTA IYO DUBISTA



Si aad foornada ugu isticmaashid karin badan ama dubid ku habeyso cabbirka 350, ama raac habka ay doonayaan hadba waxa la karinayo. Haddii aad cabbirka aad u dheereysid wuxuu kaa gubayaa cuntada. Nadiifi waxyaabaha ku daata foornada marka ay qabowdaba.



CUNTO SI TOOS AH HA UGU KOR KARSANIN BIRAH DABKA AH EE FOORNADA KU DHEX JIRA!

MAKIINADA WEELASHA DHAQDA

Makiinada Alaabta Dhaqda waxey dishaa jeermiska saxamada iyo weelasha macdanka ah. Maxoq xoqdo weelasha ama ma qaadato halka ama booska qashinka lagu qubo.


Nadiifi oo ka biyo raaci. Goor walba ka nadiifi hambada cuntada ka hadha kuna rid qashinka kana raaci saxmanka intaadan ku ridin makiinada alaabta dhaqda.

Waxaa qasab kuugu ah inaad isticmaashid saabuun qaas ah loogu tala galay makiinada alaabta dhaqda. Saabuuntaa waa mid isku urursan sidaa daraadeed koobabka ha buux dhaafinin. Marnaba ha isticmaalin saabuunta dareerta ama saabuunta dharka.

Waa inaad xaaqdaa sagxadda dhulka malin walba kuna masax saabuun iyo biyo usbuuc kasta.



MAKIINADA CUNTADA LAGU KARSHO / BURJIKO



Ka masax Dufanta iyo cuntada daadatay **SIDA UGU DHAQSIYAHA BADAN!** Iyo waxaad kaloo nadiifisaa makiinada cuntada maalin walba.



Haku shubin dufanka saxanka ama waaskada. Ku dhex shub koonbo / daasad faaruq ah kuna tuur qashinka.



Cuntada daadatay ama gubatay iyodufanta aad bay Qatar u yihiin. Sixun bey usoo uraan waxeyna soo jiitaan kutaan ama dhiqla. Dooliyo iyo jirarka jamaca ah. **DUFANTA DAADATA WAXEY SABABI KARTAA IN LAGU DHACO IYO WAXEY SABABI KARTAA DAB!**

SAXANKA AMA WAASKADA WAX LAGU DHAQO EE JIKADA/TUURISTA QASHINKA



Gurigaada wuxuu lahaan karaa jikadiisa geedka mashiinka yar ee cuntada wasaqda ah sii burburiya

Mar walba biyo qabow waa inaad socodsiisaa adigoo ka shaqeynaya qashin tuuraha.



Ha saarin lafaha, qolofka ukunta, diirka fawaakihaadka (fruit), qolofka basasha, laan ama bir godka alaabta lagu dhaqo ama meesha qashinka sii burburiso.



Hadii uu is xero qashin tuuraha, biyo ayaa ka buuxsamaya waaskada. Waa inaad demisaa una yeertaa maamulka gurigaaga.

MARNABA HA GELININ GACANTAADA QASHIN TUURAHA!

QASHIN/QASHINQUB

January						
S	M	T	W	T	F	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

Ku rid qashinka caagaga lagu siiyay ee ku jira gurigaaga. Kuna dhex hagaaji bacaha qashinka.

Qashinkaada dibada u saar maalin walba kuna soo rid qashinqub la hubo. Urka qashinka wuxuu soo jiidan doonaa xasharaadka, dooliyaasha iyo jirka badan. Ur qeyro caadi ah wuxuu keeni karaa dacwado deriskaaga ay u gudbiyaan maamulka guriga.

MARNABA HAKAGA TEGIN QASHIN MARINKA GURYAHA HORTOODA.



Haddii bulshadaada leedahay qashinka qallalan barnaamijka, raac habkooda kala soocidda qalabka.



NADAAFADA GUIUD

January						
S	M	T	W	T	F	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

Musqusha/Suuliga waa in la nadiifiyaa usbuuc walba. Waxaa kaloo ku jira nadiifintaas sagxadda dhulka, iyo gudaha iyo banaanka godka fadhiga saxarada, waaskada, halka lagu meydho ama iyo qabayska.

Halka lagu meydho waa in la nadiifiyaa si looga dhowro in ay wax ku dheg dhegaan.

Ha ogolaanin in timo ama waxyaabo kale ay ku dhex dhacaan dhuunta bulaacada.



DHIBAATADA GODKA MUSQUSHA

January						
S	M	T	W	T	F	S
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

Nadiifi gudaha, wareega salka godka musqusha usbuuc walba. Ha ogolaan in kaadida ay dhulka ku shubanto.

HADII MUSQUSHAADU SOO BUTAACDO. WAA INAA WACDAA MAAMULKA GURIGA!



Isticmaal buraash aad ku nadiifisid godka musqusha, Arinkani wuxuu ka hortagaayaa jeermiska inuu ku bilowdo kuna salbalaarto godka gudahiisa.

BURAASHAKAASNA WAX KALE HA U ISTICMAALIN!

Marnaba ha falaashgereynin waxyaabaha dumarka hoosta geshtaan, qashinka, cuntada, in badan oo ah waraaqadaha musqusha iyo waxyaabo kale godka dhexdiisa.

CARUURTAADA WAA INAA BARTAA INEYSAN BOONBALAYAASHA IYO WAXYAABAH KALE KU RIDIN GODKA MUSQUSHA!



BIYO DAADIS IYO QUBASHO

Marwalba waa iney bacda qubeyska ku dhex jirto gudaha barkadda, marwalbana nadiifi biyaha bannaanka ku soo daata isla mar ahaantii.

Rabarka yar (safety mat) ee la dhigto dhulka barkadda qubeyska wuxuu kaa ilaalin karaa kufidda ama simbirixyada.

HADDII AY JIRTO MEEL BIYO DAADINEYSO AMA TUBO XIRANTAY WAC ISLA MARKIIBA MAAMULAHA GURIGAAGA!

Ogow adiga ayaa bixin doontid qarashka haddii biyo meel ha halleysan yihiin oo aadan horay u sheegin.



1. Dharka u kala sooc midabbada furan iyo kuwa mugdiga ah.
2. Istimaal biyo qandac yar ah ama kuwo qabow marka aad u dalbeysid dhaqidida intaanan ka ahayn kuwa lambarka qoorta uga dheggan sheegayo hab gaara oo loo dhaqo.
3. Daar dhaqdada markaa ku shub oomada, ka dibna dharkii.
4. Aad ha uga buux dhaafinin dharka dhaqdada ama qallajisada.
5. Mar walba nadiifi shabaqa filterka ee qallajisada.
6. La joog dharkaaga ha uga tegin meesha.



Milkiilaha guriga waa inuu u yeelaa gurigaada geedka qiiqa ka diga (smoke alarm).

Geedka qiiqana waa inuu shaqeeyaa. Wuxuu badbaadin karaa naftaada.

HADDII GEEDKA QIIQA LEEYAHAY BATERI WAA INAAD FIIRISAA INUU SHAQEYNAYO, BEDDEL SANADKIIBA MAR. MAALIN GAAR AH U YEELO!



MARNA HA FUJIN AMA HA TUURIN GEEDKA QIIQA KA DIGA!



Tijaabi gambaleelka qiiqa qaada adigoo taabanaya batoonka yar ee xaga hore ku yaal.

Hadii uu gambaleeluhu yeero adigoo cunto karinaya, dami adigoo riixaya batoonkaas.



Hadii uu gambaleelka qiiqa sheega uusan shaqeyneynin, u yeedh maamulka gurigaaga.

Waa inaad ogaataa halka ay dab damiyuhu kaga yaalaan gurigaada ama dhismaha aad ku nooshahay, ama baro sidii loo isticmaali lahaa.



Haddii uu dab ka bilowdo jikadaada, **MARNABA** biyo haku shubin!



- 1) Haddii dabku uu yar yahay isku day inaad hawada ka xirtid adigoo ku daboolayo dabool.
- 2) Haddii dabku aad u weyn yahay isticmaal dab baqtiye sida lagu tusiyey. Mar kasta oo la isticmaalo, maamulaha guriga waa inuu dib u buuxiyo dab baqtiyahaaga si uu u shaqeeyo marka xiga ee aad u baahato inaad isticmaasho.
- 3) Haddii aad u maleyso inaad dabka baqtiin kareynin.



DADKA KA SOO WADA SAAR DHISMAHA WACNA 9 1 1! NAFTA AYAA KA MUHIIMSAN ALAABAHA!





HADDII DABKU AAD U WEYN YAHAY SI LOO DAMIYO, WAC 9 1 1!

Haddii aad awoodid, u bax bannaanka. Ka hoos bax qaaca hana ku neefsan. Wargeli deriska haddii aad awooddid. Marna ha fuulin wiishka si aad dabka uga carartid isticmaal jaranjarada.



Haddii albaabku kulul yahay , ha furin ka bax dariishadda hoose ee dhulka ama meesha loogu talo galay in dabka looga baxsado ama ku sug dariishadda inta aad caawin ka heleysid. Dhig sukumaano qoyan albaabka si qaacu bannaanka ugu soo bixin, isticmaalna maro qoyan oo aad ku neefsato.



Jidadka dhexe (hallways) iyo meelaha dadka ka dhexeeya oo aan laga ilaalinin waxyaabo in lagu tuur tuuro waa qatar waxayna keeneysaa in si kedis ah loogu kufo.



Inaad nadiifisid halka aad wada isticmaashaan gurigaaga adiga iyo deriskaaga sida daarada ama marinka u dhexeeya guryaha, ayaa waxey badbaadin u tahay, wanaajineysaana cilaaqaadka adiga iyo deriskaaga idin dhexeeya.



Shabaqa albaabyada iyo daaqadaha aad ayey muhiim ugu yihiin iney ku dhex xifdiyaan caruurta iyo xayawaanka guriga lagu rabaayadeysto, gurigaaga. Waxeyna ka ilaalineysaa iney soo galaan kutaanka/cayayaanka iyo xayawaanka.

Hadii hadaba shabaqa uu ka maqan yahay ama uu jeexan yahay, waa inaad wacdaa maamulka gurigaaga!



WXYZ 9	1	1
-----------	---	---




WAC 9 1 1 HADDII QOF SI XUN U DHAAWACMO!

Qolada badbaadada dadka ayaa kuu imaaneysa markiiba si ay kuu caawiyaan.

Marka ay ogaadaan sida uu dhibku jiro waxey kaa caawinayaan iney go aamiyaan haddii aad ambalaas u baahan tahay si isbitaalka laguugu geeyo.

Waxaa laga yaabaa inaad iska bixisid qarashka ambalaasta ama daweynta iyo wixii lagu siiyaba.



Sigaarka mareykanka wuu shitmaayaa xitaa hadaadan dhuuqeynin.

Mar walba ka taxaddar sigaarka marka aad tuureysid inuusan weli daarneyn hubi.



Ha ku cabin sigaarka sariirta dusheeda, ama meeshii kastoo laga yaabo inaad seexato.



Lacag ayaa laguugu soo dalacaayaa hadii ay jiraan meelo aad ku gubtay sigaarka.



Marnaba haku cabin agagaarka caruurta ama dumarka uurka leh.



Dadka waaweyn iyo carruurtaba weligiin ha furina albaabkiinna ama makarfoonka ha uga furin albaabka qof aadan aqoonin.



HADII AAD ARAGTO DAD WAX XADAAYA, WAXAAD WACEYSAA 9 1 1!

Mar walba albaabkaada waa inuu kuu xirnaadaa, xitaa markaad guriga joogtid. Xir oo birta geli (quful) dariishadaada intaada bixin si aad uga taxadirtid / u joojisid wax xadid iyo danbiyo kale.

Ha u oggolaanin inuu kula soo galo albaabka guryaha laga soo gelaa dad aan la aqoonin.



Hadii aad ilowdid furahaada aadna iska xirtid guriga adigoo dibada jooga, waxey kuugu kaceysaa \$50.00 kontan doolar ama wax ka badan inuu ninka guriga iskaleh kuu furo. Hadii aad lumisid furahaada, waxey kuugu kaceysaa xitaa in kabada intaas si lagaaga badalo qufulka.



Waa inaad weydiisaa dadka qariibka ah, xitaa ay ku jiraan dadka labiska dowlada xiran, in ay ku tusaan cadeyntooda marka hore.



Aqri waraaqaha lagu soo diro markaa kuwa muhiimka ah dhigo meel xafidan. Wac maamulaha kiiskaaga wixii aadan fahmin si uu kaaga caawiyo.



Sanduuqa boostaada waa inaad maalin walba fiirisaa. Waa inaad ku tuurin waraaqaha aadan dooneynin meesha laga soo galo guriga.



Hadii ay kuu timaado waraaqado aadan fahansaneyn, ama ogeysiis laguugu soo dhejiyo albaabka gurigaaga, waa inaad **SI SHAQSI AH** uga jawaabtaa.

Sidatan waa habka ogeysiisyada **GURI KASAARIDA** leysugu soo dhejiyo albaabada.




Dadka guryaha iskaleh badanaa waxey u baahan yihiin codsi qoraal ah ka horow inteysan gurigaaga wax ka hagaajinin. Waa inaad isticmaashaa ariiga codsashada dayactirka, si aad u qoratid codsi, ama weydii qofka kaa mas uulka ah inuu kaa caawino.

Website ka www.refugeehouse.org wuxuu leeyahay foom dayactir oo aad isticmaali karto.



Godka musqushayda wey gufeysantay / xirantay.



Halka qashinka aan ku xooro mashaqeyneyso.



Furaha qasabada wey sii deyneysaa / daadineysaa.



Makiinada cuntada aan ku karsado mashaqeyneyso.



Shabaqyadeyda waxey u baahan yihiin dayactirid.

Dadka intooda badan waxay seexdaan 10 p.m habeen nimo fadlan carruurtaada aamusi, si tartiib oo cod gaaban u sheekeysta, muusiko dheerna ha daarina laga bilaabo 10 p.m habaankii ilaa 8 a.m subaxdii.

Waa inaad raacdaa sharciga milkiilaha guriga uu u dhigay arrimaha guriga.

Shuruucdan waxaad ka heleysaa waraaqaha heshiiska guriga lagu kala galay Lease .



Hadii ay dhacdo in aad is afdhaaftaan deriskaada, isku day inaad kawada xaajootaan idinka oo wada jir ah. Hadii aadan sameyn karin, weydiiso caawinaad ruuxa kaa mas uulka ah ama maamulka gurigaaga.

Guryaha qaar waa laga oggol yahay xayawaanka guri joogta ah (eeyaha, mukulaalaha iwm). Hubi nooca xayawaanka ee ay oggol yihiin.



Kireystayaasha badanaa waxey bixiyaan isticmaalka kuleylka guriga, korontada, iyo qaboojiyaha / galamaseerka. Biilashaan aad ayey qaali u noqon karaan. Waa inaad raacdaa taladan si biilashaadu ay hoos kaaga dhacaan.

Heer kulbeegu wuxuu koontaroolaa cimilada gurigaaga.. Xiliga jiilaalka / ama xiliga barafka waa inaad geysaa inta u dhaxeysa 65 iyo 75 qiyaasta heer kulka. Xiliga xagaagana inta u dhaxeysa 70 iyo 75 qiyaasta heer kulka, waa hadii uu qaboojiye kuugu jiro.



Inaad geysid heer kulbeegu halka ugu sareysa, kama dhigeysa kuleylka inuu si zaa id usoo baxo ama si deg deg ah, waxaa kaloo jirta hadii aad ilowdana inaad dib usoo celiso ama aad yareyso, lacag fara badan ayaa kuugu kaceyso!



MARKII AY DAARAN YIHIIN
QABOOJIYAHA IYO KULULEEYAHA
GURIGA, DARIISHADAHA WAA
INEY XIRNAADAAN.



Goor walba waa inaad damisaa nalalka badankood mrkaad ka tageysid gurigaaga. Hal ama laba nal ha shidnaadeeno, maxaa yeelay tuugada ayaa umaleynta in qof uu joogo guriga.



**MARNABA DAAQADAHA YESAN
FURNAAN MARKUU KULEYKU SHIDAN
YAHAY!**

Haddii aad dareemeysid albaabada iyo dariishadaha iyagoo xiran iney hawo kasoo afuufmeyso, weydii milkiilaha inuu guriga u yeelo qalabka qabowga ka celinayo guriga.



Xirashada kaalsada ama sigisyada, saraawiisha luga dheeraha iyo funaanadaha gacmo dheeraha, ama dhar badan oo aad firaashato waxay kaa caawinayaa iney duggaal ku siiyaan oo qabowga kaa yaraado, waana kaaga raqiisan yihiin markaa haddii aad kulukeeyaha heat damisid.



WELIGAA MAKIINADDA CUNTO KARINTA
AMA FOORNADA MIDNA HA U
ISTICMAALIN KULEYL AHAAN INAAD U
SHIDATO!



Waa inaad xirtaa albaabka firintijeerka in ala intii macquul ah. Inaad albaabka firintijeerka uu furnaado waxey qasaarineysaa koronto, waxey kaloo keeneysaa in cuntadu ay xumaato. Tan waa aad ku jirraneysaa.

- 1.) Waa inaad bixisaa biilashaada.
- 2.) Waa inaad waxwalba nadiifisaa.
- 3.) Waa inaad ka taxadartaa alaabadaada.
- 4.) Waa inaad ogaataa sida loola dhaqmo dabka iyo gar gaarka deg dega ah.
- 5.) Waa inaad taxadar siisaa waraaqadaha iyo ogeysiisyada.
- 6.) Waa inaad noqotaa deris wanaagsan.
- 7.) Waa inaad qasaarinin tamarta / qowada dabka dhalisa.



Waa inaad bixisaa biilashaada



Waa inaad waxwalba nadiifisaa



Waa inaad ka taxadartaa alaabadaada



Waa inaad ogaataa sida loola dhaqmo dabka iyo gar gaarka deg dega ah



Waa inaad taxadar siisaa waraaqadaha iyo ogeysiisyada.



Waa inaad noqotaa deris wanaagsan



Waa inaad qasaarinin tamarta / qowada dabka dhalisa

Isku duba ridayaalka wada shaqeynta mahruucan waxaa weeyaan:

Jennifer Gueddiche, Program Director of the African Community Center, **Scott Robbins**, Refugee Housing Project Manager for Mercy Housing, and **Carol Kimball**, Artist, with interns **Jennifer Harden** and **Zara Tenore**.



Mercy Housing

1999 Broadway, Suite 1000, Denver, CO 80202
Phone: 303-830-3300 Fax: 303-830-3301
www.mercyhousing.org www.refugeehouse.org

Somali 906